IIB MA GALO

الجريدة الرسمية

# FAAFINTA RASMIGA AH

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad | Muqdisho, 15 Agoosto 1978 | L. 1R8

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiis'o waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Lr.anta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAAD

SHAHRCI

SHARCI L. 29 ee 29 Luulyo 78, Dhismaha Wakaaladda Biyaha ee Kismaayo. Bogga 539

SHARCI L. 30 ee 29 Luulyo 78, Dhismaha Wakaaladda Biyaha ee Hargeysa. » 546

SHARCI L. 31 ee 29 Luulyo 78, Canshuur ka Dhaafid Wakaaladda Horumarinta Biyaha. » 553

SHARCI L. 32 ee29 Luulyo 78,Maamulka Laamaha Ceelasha Gobolada. » 554

**X E E R**

### QAYBTA LABAAD

**W. M.**

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

## QAYBTA SADDEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 13.8.78, lumid Buug Kayd Lamb. 3870 ku qoran Shs. 4.609/50 uu leeyahay Maxamed Sheekh Xuseen L. 478 » 555

ISKU YEERIDDA SAAMILEYDA SHIRKADDA MORODI S.p.A. ee Saldhiggeedu yahay Muqdisho L. 478/Bis — 556 —

QAYBTA KOWAAD

SHAHRCI

SHARCI L. 29 ee 29 Luuyo 78, Dhismaha Wakaaladda Biyaha ee Kisimaayo.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21.10.1969;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in Maamulka Biyaha Kismaayo noqdaa Hay'ad iskeed isu maamusha shaqsiyad qaynuun lahaato;

ISAGOO TIXGELIYAY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S. iyo Golaha Wasiirada;

**WUXUU SOO SAARAYAA**

**Sharciga soo socda:-**

**Qodobka 1aad**

**Abuuridda Wakaaladda**

Wakaaladda Biyaha ee Kismaayo ayaa Sharcigan lagu dhisay waxaana hadda ka dib lagu tilmaamay Wakaalad

**Qodobka 2aad**

Wakaaladdu waxay ka mid tahay Wakaaladaha Dawladda ee Madaxa Bannaan, waxayna leedahay jirid, astaan sharci iyo shaqsiyad qaynuuni ah.

**Qodobka 3aad**

Wakaaladdu waxay u hogaansami doontaa sharciyada iyo xeerarka saameeya Wakaaaladaha Madax Brinaan ee Dawladda gaar ahaan:-

b) Xeerkan lam. 16 ee1.4.1970 ee ku saabsan faaqidaadda xisaabaha Wakaaladda Madaxa-Bannaan;

t) Xeerka lam. 58 ee 31 .7.1972 ee Lacagta Wakaaladaha Dawladda;

j) Sharciga lam. 36 ee 22.4.1972 ee Shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa-Bannaan iyo wixii beddelaad ah ee ka soo bxay sharciga sare lagu xusay ka dib.

**Qodobka 4aad**

**MEELAYNTA WAKAALADDA**

Wakaalada Biyaha ee kismaayo waxaa lagu meeleeyay derejada ah «C»' Xarunteeduna waxay tahay Magaalada Kismaayo, wxayna ku yeelan doontaa laamo Degmooyinka uu ka kooban yahay Gobolka Jubada Hoose.

### Qodobka 5aad

## UJEEDAD A WAKAALADDA

Ujeedada Wakaaladda ama xilkeeda wuxuu yahay sida soo socda:-

1.- Inay sahmiso, soo saarto, qaybisana biyo Caafimaad qaba oo ku filan Magaało Mdaxda Gobalka (Kismaayo);

2.- Inay biyo Caafimaad qaba ka haqab tirto Magaalada Kismaayo ;

3.- Iney u samayso Magaalada Kismaayo Dhuumaha biyha qaada iyo meelo biyo laga dhaansado;

4.- Inay u samayso dhuuman biyaha geeya guryaha iyo meelaha caanka ah iyadoo kor ka qaadanaysa;

5.- Inay ururiso kana faa'iidaysato war ururin ku saabsan biyaha dhulka iyo kuwa sare (undergorund and surfece watar date) ee Gobalka;

6.- Inay si cilmi ah u baarto sida ugu haboon ee biyaha Degmada loogaga faa'iidaysan karo;

7.- Inay yeelato awood Farsamo oo ay ku fulin karto Mashruuc biyood oo Gobol, iyadoo ku talo gelaysa qorshaynta, dersidda, xarardhka, kormeerka, xannaanada, wadidda iyo shaybaarka;

8.- Inay habayso, dibeddana ka dirto alaabta; qalabka iyo, baahitirka hawsheeda la xiriira;

9.- Inay aqoonta shaqaaleheeda kor u dhigto gees kastaba.

### Qodobka 6aad

## AWOODDA IYO XUQUUQDA WAKAALADDA

1.- Wakaaladdu waxay leedahay awood buuxda oo ay ku fuliso ujeedooyinka loo abuuray, xilkeeda iyo xuquuqdeeda sharciga uu siiyay, iyadoo mar walba dhawraysa kuna dhaqmaysa sharcigan; Sharciyada u degsan Wakaaladaha Madaxa Bannaan iyo mabaa'diida guud ee Maamulka guud saameeya.

2.- Wakaaladdu waxay leedahay xuquuqda soo socoda:-

a) In loo horreysiiyo baahideeda dhulka iyo banaynta meelaha hawshu ka socoto (Public or private right of-way or Puplic utility eacement);

b) Inay mariso ama ku isticmaa sho jidadka ee meel kasta dhuumaha biyaha la marinaayo Jidadka.

t) Inay sicirka biyaha iyo qiimaha biyo-gelinta guryaha goyso, isla markaana awood ay socodsiiso xeerka biyo-gelinta yeelato, iyo isticmaalka biyaha (servece conecctions regulations);

j) Hadday lagama maarmaan noqoto mashruuca biyo safeyn ah ku dhisto ceelal ka qodo Degmooyinka deriska la ah Degmada Kismaayo si magaalo madaxda Gobolka J. Hoose biyo ku filan u hesho;

x) Wakaaladdu waxay yeelanaysaa awood oo ah inay sa-xiixdo heshiisyo la xiriira hawlaheeda oo qodobadiisa ka mid noqon kara canshuur ka dhaafid (tax free charges or lives), iyadoo ay kala tashanayso Wasiirka Wasaaradd Maailyadda oo ogolaanshihiisa ku xiran tahay xuquuqda, awoodda iyo xilka ku tilmaaman sharciga iyo xeerka hoos kusheegan oo ku saabsan Dhismaha Wakaalada hore ee Biyaha Xamar; wixii shrcigan ka soo horjeeda ama la socon mooyee:

I. Sharcga lam. 2 ee 11.12.1967 oo lagu dhisay Wakaaldda hore ee Biyaha Xamar;

II) Xeerka lam. 181 ee 8.8.1968 ee nidaaminaaya lana xi-riira fulinta sharciga Dhismah Wakaaladda hore ee Biyaha Xamar.

### Qodobka 7aad

### KORMEERKR IYO AWOODDA WASIIRKA

1. Kormeerka Guud ee Wakaaladda waxaa yeelan doona Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;
2. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay inuu had iyo jeer siinkalo awaamiir iyo talooyin ku saabsan Maamulka sidii hore loogu qaadi lahaa Wakaaladana waxtar ku noqon lahayd;
3. Isagoo tixgelinaayay qod, 1aad ee beddelaadda sharciga lam. 36 ee 22.3.1972, Wasiirku wuxuu ku leeyahay Wakaaladda awood iyo mas'uuliyad buuxda sida ku tafaftiran sharciga lam. 17 ee 21 Abriille 1974.

### Qodobka 8aad

### DHISMAHA WAKAALADDA

1. Wakaaladu waxaa ka Madax noqon doona Maareeye Guud;
2. Wakaaladdu waxay yeelanaysaa:Maarayn Guud, waaxyo, xubno, Laamo iyo xafiisyo.

Qodobka 9aad

## MAGACAABIDDA IYO XILKA

1. Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Biyaha Kismaayo waxaa lagu magacaabi doonaa Xeer uu soo saxiixo Madaxwaynaha J.D.S., isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo go'aanka Guddiga siyaasadda XHKS. iyo Golaha Wasiiradda;

2. Maareeyaha Waaxyaha, waxaa lagu magacaabi doonaa Xeer uu saxiixo Madaxweynaha, isagoo tixgelinaaya talada Wasiirka Macdanta iyo Biyaha ;

3. Madax kasta wuxuu ka mas'uul yahay wanaagga iyo xumaatada Qaybtiisa ka timaada, dhan hawleed, dhan dhaqaale iyo dhanka asluubta shaqaalaha, iyadoo mar walba la raacayo habka kala sarreeynta xilka Xafiisyada.

Qodobka 10aad

## XILKA MAAREEYAHA GUUD

1. Maareeyaha Guud wuxuu leeyahay awood iyo mas'uuliyad la siman tan uu leeyhay Agaasimaha Guud ee Wasaarad, sida ku qeexan qod. 3aad ee Xeerka lam. 316 ee 7.12.1975;
2. Maareeyaha Guud Xilkiisu wuxuu yahay:-

   b) Inuu saxiixo heshiisyada ay Wakaaladdu dhinac ka tahay isagoo oggolaansho ka haysta Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

   t ) Inuu mas'uul ka yahay habka Maamulka shaqada Wakaaladda, wuxuuna awood u leeyahay inuu sameeyo wixii qaraar ah ee ku saabsan Maamulka iyo canaanta shaqaalaha Wakaaladda;

   j) Inuu ku dhaqaaqo wixii qaraar oo deg-deg ah, isagoo isla markaas ogeysiinaya Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

   x) Inuu bixiyo wixii amaah lagama maarmaan ah si hawsha Maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fiican ugu socdaan;

   kh) Inuu fuliyo wixii hawl maamulka shaqada Wakaaladdu ee caadi ah;

   d) Inuu fuliyo wixii hawl Maamulka shaqada ee aan caadi ahayn; isagoo ka haysta ogolaansha qoraal ah Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyah;

3. Markuu ka maqan yahay Maareeyaha Guud shqada ama ay jiraan asbaabo k reebaya shaqada waaa hawsha si, ku-meel gaar ahaan u fulinaaya Maareeyaha ugu da,a wayn xagga shaqada.

**Qodobka 11aad**

**XUQUUQDA QAYNUUNIGA IYO DHAQAA-LAHA EE SHAQAALAHA WAKAALADDA**

Xuquuqda Qaynuuiniga ah iyo tan dhaqaalaha ee Maa-reeyaha Guud, Agsimayaasha, waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Wakaaladda, waxaa xukumi doona xeerka lam. 36 ee 22.4.72, Makuna saabsan shaqaalaha Wakaaladda iyo Wakaaladaha Ma-dax-Bnnaan.

Xuquuqda shaqaalaha oo maalinta sharcigan dhaqan ge-laayo ka tirsan maamulka biyaha Kismaayo waxaa lagu waree-jiyay Wakaaladda Biyaha Kismaayo, iyagoo loo aqoonsaday shaqadii hore in ay tahay mid sii socota (ricconscimento di continuità di lavoro e di anzianità di servizio della data di assunzione), laga bilaabo maalinta qof kasta la qoray, waxayna la mid yihiin dhanka xuquuqda iyo dhanka dhaqaalaha sha-qaalaha Wakaaladdu ay qorato.

**Qodobka 12aad**

**Qaabka *Wakaaladda***

1. Wakaaladdu waxay yeelanaysaa qaab la xiriira dhisma-heeda;
2. Qaabka Wakaaladda Biyaha Kismaayo waxaa lagu soo saari doonaa Xeer uu saxiixo Madaxwanaha J.D.S; isagoo tixgelinaya talada uu soo jeediyo Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha.

   Qaabka Wakaaladda waa in lagu dhammeeyaa muddo 6 (lix) bilood, laga bilaabo maalinta sharcigan uu dhaqan galo.

**Qodobka 13aad**

**HANTIDA WAKAALADDA**

Hantida Wakaaladdu waxay ka kooban tahay:-

1. Lacagta u kaydsan maamulka hore ee Biyaha Kismaayo;
2. Lacagta ka soo gelaysa iibka biyaha guryaha meelaha ga-nacsiga ama Hay'adaha Dawladda ;

3. Wixii lcag ah oo deeq ahaan loo siiyo Wakaaladda iyo wixii dayn ah oo ay ku fulinayaan Mashraariic cusub ee hawshooda la xiriirta.

### Qodobka 14aad

### AMAAH SHRCI AH

1. Wakaaladu si ay u hirgeliso hawsheeda lacag waxay ka amaahan kartaa Bankiyada Dawladda iyo meelihii kale oo ku habboon, ayadoo haysata guddoonka Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;
2. Marka amaah lagala xaajoonaayo Bankiyada dibadda ah ama Hay'adaha kale Wakaaladuu waxay tahay mid si sharci ahaan Wakiil ka noqon karta Dawladda Soomaaliyeed.

### Qodobka 15aad

### XISAABTA SANNADKA

Xisaabta sannadka wuxuu ka bilaabmayaa 1da Jannaayo wuxuuna ku dhammaanayaa 31ka Disembar ee sannad waliba.

### Qodbka 16aad

### MIISAANIYADDA WAKAALADDA

a) Miisaaniyada socota (preventivo):-

1. Maareeyaha Guud, marka ay tahay 30 Oktoobar ama inta ka horreysa sannad kasta, waa inuu isku dubaridaa Miisaaniyadda caadiga ah iyo tan Horumarinta oo ku saabsan sannadka soo socda, isagoo faah-faahinaya kuna muujinaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Wakaaladda sannadka soo socda, waxaanu hor dhigi doonaa si loo ogolaado Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo kan Maaliyadda.

2. Sannadka lacagta ee Wakaaladda wuxuu bilaabanayaa 1da Jannaayo, dhammaanayaa 31 Disembar ee sannad waliba.

b) Xiritaanka Miisaaniyadda (Consuntivo):-

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 31 Maarso ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubaridaa xiritaanka Miisaaniyadda ee sannadka la soo dhaafay, isagoo isku hagaajinaya xisaabtii sannadka iyo bandhigii macaashka iyo khasaaraha Wakaaaladda, taana uu u gudbiyo Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo biyaha iyo kan Maaliydda.

2. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda wuxuu awood u leeyahay isagoo la tsahanaya Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyha inuu ogolaado xiritaanka Miisaaniyadda, wuxuuna amar ku bixin karaa in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo kharajka ay bixinayso Wakaaladdu.

### Qodobka 17aad

### MAAMULKA IYO HORUMARKA XISAABAHA

1. Wakaaladdu, had iyo jeer waa in maamul hagaagsan ay ku dhaqan gelisaa aduunka iyo hawlaha kale ee lacagta ku saabsan, iyadoo ilaalinaysa sida haboon ee qawaaniinta iyo xeerarka Qaranka ku xusan.
2. Wakaaladdu waxay hawsheeda ku maamuli doontaa dakhliga ka soo xerooda hawsha ay qabato waana inay lacag u kaydisaa qiimadhaca alaabta, sida ugu habboonna u muumusha kaydkaas.
3. Xisaabaha Wakaaladda Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyha ama cid asaga ka wakiil ah ka sokow waxaa kormeeri doona Laanta goonida ah ee Wakaaladaha Madaxa bannaan.

### Qodobka 18aad

### KA DHAAFID CHNSHUUR

Qalabka u soo dega Wakaaladda Biyaha ee Kismaayo lana xiriirta soo saarka iyo socodsiinta qaybinta biyaha, waxaa laga dhaafay canshuurta furdada (import duty).

### Qodobka 19aad

### XEER GUUD

Madaxwaynaha J.D.S. wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha inuu soo saaro xeer nidaamiye oo lagu Faah-Faahinaayo sharcigan laguna hirgelinayaa habka ugu wacan oo hawsha Wakaaladdu ay ku fulin doonto ama looga hortagaayo dhibaatooyinka ka iman kara fulinta xilka Wakaaladda.

### Qodobka 20aad

### TIRTIRID

Sharci ama xeer kasta oo kasoo horjeeda ama la socon karin sharcigan waa la tirtiray.

### Qodobka 21aad
### DHAQAN GELID

1. Sharcigan hore ayuu ka dhaqan gelayaa isla markiiba waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.
2. Sharcigan waa inuu ka mid noqdaa sharciyada Rasmiga ah. J.D.S.;
3. Qof waliba waa inuu dhawraa sharcigan.

Muqdisho, 29.7.78

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)
Madaxwaynaha J.D.S.

SHARCI L. 30 ee 29 Luulyo 78, Dhismaha Wakaaladda Biyaha ee Hargeysa;

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in Maamulka Biyaha Hargeysa noqdaa Hay'ad iskeed isu maamusha shaqsiyad qayuunn lahaato;

ISAGOO TIXGELIYAY: Go'aanka Gudiga Siyaasadda ee XHKS, iyo Golaha Wasiirrada.

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Sharciga soo socda:-

**Qodobka 1aad**

**ABUURIDDA WAKAALADDA**

Wakaalada Biyahaa ee Hargeysa ayaa sharcigan lagu dhisay, waxaana hadda ka dib lagu tilmaamaya Wakaalad.

Qodobka 2aad

Wakaaladdu waxay ka mid tahay Wakaaladaha Dawladda ee Madaxa-Bannaan, waxayna leedahay jirid, astaan sharci iyo shaqsiyad qaynuuni ah

**Qodobka 3aad**

Wakaaladdu waxay un hogaansami doontaa sharciyada iyo xeerarka saameeya Wakaaladaha Madaxa Bannaan ee Dawlada gaar ahaan:

b) Xeerka lam. 16 ee 1.4.1970 ee ku saabsan faaqidaadda xisaabaha Wakaaladda Madaxa-Bannaan.

t) Xeerkt Lr. 58 ee 31.7.1972 ee lacagta Wakaaladaha Dawladda;

j) Sharciga Lr. 36 ee 22.4.1972 ee shaqaalaha Wakaaladaha Maadxa-Bannaan iyo wixii beddelaad ah ee ka soo baxay sharciga sare lagu xusay ka dib.

**Qodobka 4aad**

**MEELAYNTA WAKAALADDA**

Wakaalada Biyaha ee Hargeysa waxaa lagu meeleeyay darajada ah «C» Xarunteeduna waxay tahay Magaalada Hargeysa waxayna ku yeelan doontaa Laamo Degmooyinka uu ka kooban yahay Gobolka Waqooyi Galbeed.

## Qodobka 5aad

## UJEEDADA WAKAALADDA

Ujeedada Wakaaladda ama xilkeeda wuxuu yahay sida soo soddca:-

1. Inay sahamiso, soo saarto, qaybisana biyo Caafimaad qaba oo ku filan magaalo madaxda Gobalka (Hargeysa);
2. Inay Biyo Caafimaad qaba ka haqab tirto Magaalada Hargeysa;
3. Inay samayso magaalada Hargeysa dhuumaha biyaha qaada iyo meelo biyo laga dhaansado;
4. Inay u samayso dhuumaha biyaha geeya iyo meelaha caanka ah iyo iyadoo kiro ka qaadanaysa ;
5. Inay ururiso kana faa'iidaysato war ururin ku saabsan biyaha dhulka iyo kuwa sare (underground and surface water date) ee Gobalka;
6. Inay si cilmi ah u baarto sida ugu haboon ee biyaha Degmada loogaga faa'iidaysan karo;
7. Inay yeelato awood Farsamo oo ay ku fulin karto Mashruuc biyood oo Gobol, iyadoo ku talo geleysa qorshaynta, dersidda xarardhka ,Kormeerka, xannaanada, wadida, iyo, shaybaarka;
8. Inay habayso, dibeddana ka dirto alaabta, qalabka iyo baahitirka hawsheeda la xiriirta;
9. Inay aqoonta shaqaalaheeda kor u dhigto gees kastaba

## Qodobka 6aad

## AWOODDA IYO XUQUUQDA WAKAALADDA

1. Wakaaladdu waxay leedahay awood buuxda oo ay ku fuliso ujeeddooyinka loo abuuray, xilkeeda iyo xuquuqdeeda sharciga uu siiyay, iyadoo mar walba dhawraysa kuna dhaqmaysa sharcigan, sharciyada u degsan Wakaaladaha Madaxa Bannaan iyo mabaa'diida guud ee maamulka guud saameeysa.
2. Wakaaaladda waxay leedahay xuquuqda soo socda:-
   a) In loo horreysiiyo baahideeda dhulka iyo baneynta meelaha hawshu ka socoto (Pubic or private right of way or public utility easement);
   b) Inay mariso ama ku isticmaasho jidadka ee meel kasta dhuumaha biyaha la marinaayo;

t) Inay sicirka biyaha iyo qiimaha biyo-gelinta guryaha goyso, isla markaana awood ay socodsiiso xeerka biyo-gelinta yeelato, iyo isticmaalka biyaha (servece conectoin regulations);

j) Hadday lagama maarmaan noqoto Mashruuca biyo safeyn ah ku dhisto ceelal ka qodo Degmooyinka deriska la ah Degmada Hargeysa si, magaalo Madaxda G. W. Galbeed biyo ku filan u hesho;

x) Wakaaladdu waxay yeelanaysaa awood oo ah inay saxiixdo heshiisyo la xiriira hawlaheeda oo qodobbadiisa ka mid noqon karaan canshuur ka dhaafid (tex, fee, charges or livies) iyadoo ay kala tashanayso Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda oo ogolaanshihiisa ku xirantahay xuquuqda, awoodda iyo xilka ku tilmaaman sharciga iyo xeerka hoos ku sheegan oo ku saabsan Dhismaha Wakaaladda hore ee Biyaha Xamar; wixii sharcigan ka soo horjeeda ama uusan la socon mooyee;

I Sharciga lam. 2 (labo) ee 11.12.1967 oo lagu dhisay Wakaaladda hore ee Biyaha Xamar;

II Xeerka lam. 181 ee 8.8.1968 ee nidaaminaya lana xiriira fulinta sharciga dhismaha Wakaaladda hore ee Biyaha Xamar.

### Qodobka 7aad

### KORMEERKA IYA AWOODDA WASIIRKA

1. Kormeerka Guud ee Wakaaladda waxaa yeelan doona Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo Biyaha;
2. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay inuu had iyo jeer siinkaro awaamiir iyo talooyin ku saabsan Maamulka sidii hore loogu qaadi lahaa Wakaaladana waxtar ku noqon lahayd
3. Isagoo tixgelinaaya qod. 1aad ee beddelaadda sharciga lam. 36 ee 22.3.1972, Wasiirku wuxuu ku leeyahay Wakaaladdu awood iyo mas'uuliyad buuxda sida ku tifaftiran sharci lam. 17 ee 21 Abriile 1974.

### Qodobka 8aad

### DHISMAHA WAKAALADDA

1. Wakaalada waxaa ka madax noqon doona Maareeye Guud;
2. Wakaaladdu waxay yeelanaysaa, Maareyn guud, Waaxyo Xubno, Laamo iyo Xafiisyo,

Qodobka 9aad

## MAGACAABIDDA IYO XILKA

1. Maareeyaha Guud ee Wakaaladd Biyaha Hargeysa waxaa lagu Magacaabi doonaa Xeer uu soo saxiixo Madaxweynaha J.D.S. isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo go'aanka Guddiga Siyaasadda XHKS. iyo Golaha Wasiiradda;

2. Maareeyaasha Waaxyaha, waxaa lagu Magacaabi doonaa Xeer uu saxiixo Madaxwaynaha J.D.S. isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

3. Madax kasta wuxuu mas'uul ka yahay wanaagga iyo xumaanta qaybtiisa ka timaada, dhan hawleed, dhan dhaqaale iyo dhanka asluubta shaqaalaha, iyadoo mar waliba la raacayo habka kala sarreynta Xilka Xafiisyada.

Qodobka 10aad

## XILKA MAAREEYAHA GUUD

1. Maareeyaha Guud wuxuu leeyahay awood iyo mas'uuliyad la siman tan uu leeyahay Agaasimaha Guud ee Wasaarad, sida ku qeexan qod. 3aad ee Xeerka lam. 316 ee 7.12.1975;

2. Maareeyaha Guud Xilkiisu wuxuu yahay:-

b) Inuu saxiixo hashiisyada ay Wakaaladdu dhinac ka tahay, isagoo ogolaansho ka haysta Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

t) Inuu mas'uul ka yahay habka maamulka shaqada Wakaaladda, wuxuuna awood u leeyahay inuu sameeyo wixii qaraar ah oo ku saabsan Maamulka iyo canaanta shaqaalaha Wakaaladda;

j) Iuuu ku dhaqaaqo wixii qaraar oo deg-deg ah, isagoo isla markaas ogeysiinaya Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

x) Inuu bixiyo wixii amaah lagama maarmaan ah si hawsha maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fiican ugu socdaan;

kh) Inuu fuliyo wixii hawla maamulka shaqada Wakaaladda ee caadi ah;

d) Inuu fuliyo wixii hawl maamulka shaqada ee aan caadi ahayn; isaga oo ka haysta ogolaansho qoraal ah Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

3. Markuu ka maqan yahay Maareeyaha Guud shaqada ama ay jiraan asbaabo ka reebaya shaqada waxaa hawsha si, ku meel gaar ahaan u fuliynaya Maareeyaha ugu da'a wayn xagga shaqada.

### Qodobka 11aad

## XUQUUQDA QAYNUUNIGA IYO DHAQAA.

## LAHA EE SHAQAALAHA WAKAALADDA

Xuquuqda qaynuuniga iyo tan dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud, Maareeyayaasha, Waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Wakaaladda, waxaa Xukumi doona xeerka lam. 36 22.4..72, kuna saabsan shaqaalaha Wakaalada iyo Wakaaladaha Madaxa Bnnaan.

Xuquuqda shaqaalaha oo maalinta sharcigan dhaqan gelayo ka tirsan Maamulka biyaha Hargeysa waxaa lagu wareejiyay Wakaalada Biyaha Hargeysa, iyagoo loo aqoonsaday shaqadii hore in ay tahay mid sii socota (riconoscimento di cntinuita, di lavoro e di ansianita, di servizio della data di assunzione), laga bilaabo maalinta qof kasta la qoray, waxayna la mid yihiin dhanka xuquuqda iyo dhanka dhaqaalahaba shaqaalaha Wakaaladdu ay qorato.

### Qodobka 12*aad*

## QAABKA WAKAALADDA

1. Wakaaladdu waxay yeelanaysaa qaab la xiriira dhismaheeda;

2. Qaabka Wakaaladda Biyaha Hargeysa waxaa lagu soo saari doonaa Xeer uu saxiixo Madaxwaynaha J.D.S isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha.

Qaabka Wakaaladda waa in lagu dhammeeyaa muddo 3 (seddex) bilood, laga billaabo maalinta sharcigan uu dhaqan galo.

### Qodobka 13aad

## HANTIDA WAKAALADDA

Hantida Wakaaladdu waxay ka kooban tahay :-

1. Lacagta u kaydsan maamulka hore ee Biyaha Hargeysa;
2. Lacagta kasoo geleysa iibka biyaha guryaha meelaha ganacsiga ama Hay'adaha Dawladda, iyadoo laga reebayo masaajidaha;

3. Wixii lacag ah oo deeq ahaan loo siiyo Wakaaladda iyo wixii dayn ah oo ay ku fulinayaan Mashaariic cusub ee hawshooda la xiriirta.

### Qodobka 14aad

### AMAAH SHARCI AH

1. Wakaalddu si ay u hirgeliso hawlaheeda lacag waxay amaahan kartaa Bankiyada Dawladda iyo meelihii kale oo ku haboon, ayadoo haysata gudoonka Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;
2. Marka amaah lagala xaajoonayo Bankiyada dibadda ah ama Hay'adaha kale, Wakaaladdu waxay tahay mid si sharci ahaan wakiil ka noqon karta Dawladda Soomaaliyeed.

### Qodobka 15aad

### XISAABTA SANNADKA

Xisaabta Sannadka wuxuu ka billaabanayaa 1da Jannaayo wuxuuna ku dhammaanayaa 31ka Disembar ee sannad waliba.

### Qodobka 16aad

### MIISAANIYADDA WAKAALADDA

a) Miisaaniyada socota (preventivo):-

1. Maareeyaha Guud, marka ay tahay 30ka Oktoobar ama inta ka horreysa sannad kasta, waa inuu isku dubaridaa Miisaaniyadda caadiga ah iyo tan hormarinta oo ku saabsan sannadka soo socda, isagoo faah-faahinaya kuna muujinaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Wakaaladda sannadka soo socda, wuxuuna hor dhigi doonaa si loo ogalaado Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo kan Maaliyadda;
2. Sannadka lacagta ee Wakaaladdu wuxuu bilaabanayaa 1da Jannaayo, wuxuuna dhammaanayaa 31 Disembar ee Sannad waliba;

b) Xiritaanka Miisaaniyadda (Consuntivo):-

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 31 Maarso ama ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa xiritaanka Miisaaniyadda ee sannadka la soo dhaafay, isagoo isku hagaajiyay xisaabtii sannadka iyo Bandhigii macaashka iyo Khasaaraha Wakaaladda, taana uu u gudbiyo Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo kan Maaliyadda
2. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda wuxuu awood u leeyahay isagoo la tashanaya Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha inuu ogolaado xiritaanka Miisaaniyadda, wuxuuna amar ku bixin karaa in lagu qoro Faafin Rasmiga ee Dawladda iyadoo kharajka ay bixinayso Wakaaladdu.

### Qodobka 17aad

### MAAMULKA IYO KORMEERKA XISAABAHA

1. Wakaaladdu, had iyo jeer waa in maamul hagaagsan ay ku dhaqan gelisaa adduunka iyo hawlaha kale ee lacagta ku saabsan, iyadoo ilaalinaysa sida habboon ee qawaaniinta iyo Xeerarka Qaranka ku xusan.
2. Wakaaladdu waxay hawsheeda ku maamuli doontaa dakhliga kasoo xerooda hawsha ay qabato waana inay lacag u kaydisaa qiimadhaca alaabta, sida ugu habboon u maamushaa kaydkaas.
3. Xisaabaha Wakaaladda Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha ama cid isaga ka wakiil ah ka sokow waxa Kormeeri doona Laanta goonida ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

### Qodobka 18aad
### CANSHUUR KA DHAAFID

Qalabka u soo dega Wakaaladda Biyaha ee Hargeysa lana xiriiro soo saarka iyo socodsiinta qaybinta biyaha, waxaa laga dhaafay canshuurada furdada (import duty).

### Qodobka 19aad
### XEER GUUD

Madaxwaynaha J.D.S. wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelininaaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha inuu soo saaro xeer nidaamiye oo lagu Faah-faahinayaa sharcigan laguna hirgelinayaa habka ugu wacan oo hawsha Wakaaladda ay ku fulin doonto ama loogahortagayo dhibaatooyinka ka imanan kara fulinta xilka Wakaaladda.

### Qodobka 20aad
### TIRTIRID

Sharci ama xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan waa la tirtiray.

### Qodobka 21aad
### DHAQAN GELID

1. Sharcigan hore ayuu ka dhaqan gelayaa isla markiiba waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.
2. Sharcigan waa inuu ka mid noqdaa sharciyada rasmiga ah ee J.D.S.
3. Qof waliba waa inuu dhawraa, tixgeliyaa, kuna qasbaa dadka kale inay dhawraan sharcigan;

Muqdisho 29 Luulyo 1978

Madaxwaynaha J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

**SHARCI L. 31 ee 29 Luulyo 78, Canshuur ka dhaafid Wakaaladda Horumarinta Biyaha.**

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada kala ah 17,18 iyo 19 ee Habka Maamulka Dalka;

ISAGOO ARKAY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S. iyo Golaha Wasiiradda;

**WUXUU SOO SAARAYAA**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Qalabka iyo alaabta u soo dega Wakaaladda Horumarinta Biyaha lana xiriiro soo saarka, socodsiinta iyo qaybinta nooc kasta biyaha waxaa laga dhaafay Canshuurada **Furdada** (im port duty);

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Jannaayo 1978. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 29 Luulyo 1978

Madaxwaynaha J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 32 ee 29 Luulyo 78, Maamulka Laamaha Ceelasha Gobollada.-

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad, iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. kala ah 17,18, iyo 19 ee 1.7.1976;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in maa-Mulka Ceelasha ee Goballada lagu soo celiyo Wakaaaladda Horumarinta Biyaha, lagana wareejiyo Gobolada oo dhibaato kala kulmaya dhanka Farsamada biyo soo saarka oo awoodaas ka maqnayn Wakaaladda Horumarinta Biyaha;

ISAGOO TIXGELIYAY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee XHKS. iyo Golaha Wasiiradda.

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Sharciga soo socda:

**Qodobka 1aad**

Maamulka Laamaha Ceelasha ee Gobollada waxaa lagu soo celiyay Wakaaladda Horumarinta Biyaha, iyadoo laga wareejiyay Dawladda Hoose ama Gobolada oo hayn jiray Maamulka Ceelashaas.

Qodobka 2aad

La wareegidda Maamulka Laamaha Ceelasha ee kor ku tilmaaman waxaa ka reeban Gobolka Banaadir iyo Magaalo Madaxda Gobollada Waqooyi Galbeed iyo Jubbada Hoose.

Wakaaladdu waxay awood u yeelanaysaa dakhliga kasoo gala Ceelasha Gobollada.

**Qodobka 4aad**

Dhammaan shaqaalaha ka tirsanaan jiray Maamulka Ceelasha ee Gobollada, waxaa loo wareejiyay Wakaaladda Horumarinta Biyaha oo ku yeelanayaan xuquuqdooda dhanka qaynuunka iyo dhaqaalaha, mudadii ay Dawladdaha Hoose ee Degmooyinka iyo laamaha Ceelasha ee Gobollada ay ka tirsanaan jireen.

**Qodobka 5aad**

Shasrcigan wuxuu dhaqan galayaa marka laga bilaabo 1.1.1978.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 29 Luulyo 78

MADAXWEYNAHA J.D.S.

## MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo Ogeysiiska Bangiga

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L.9.9.65, N. 2 lumidda Buugga Kaydka Lam. 3870, kuna qoran tahay Sh. So. 4.609,50/- Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad.

### WUXUU AMRAYAA

**In loo cusboonaysiiyo Buugga Kaydka ka dib markii ay ka** soo wareegato 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

### WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Maxamed Sheekh Xuseen ama qof isla isaga ka sita Wakaalad sharci ah, iyadoo la sugaayo muddo (30) sodon maalmood ah ee aan kor ku soosheegnay.

Muqdisho 13 8 78.

Gudoomiyaha Maxkamadda Gobalka Banaadir
(Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 478

**ISKU YEERID SAAMILAYDA SHIRKADDA MORDI S.P.A.EE SILDHIGEEDU YAHAY MUQDISHO**

Saamilayda Shirkadda Morodi S.p.A. waxaa la ogeysiinayaa in ay ka soo qayb galaan shirka guud ee lagu qaban doono Xafiiska shirkadda SO.N.A.S. ee Muqdisho maalinta bisha Nofembar ay tahay 5ta saacadduna tahay 9 ka subaxnimo.

Hadduu fadhigaas ansixi waayo, waxaa mar labaad laysu imanayaa maalinta ku xigta ee bisha Nofembar tahay 6/da isla Xafiiskaas iyo isla saacaddaas, si qaraar looga gaaro arrimaha joogtada ah ee kala ah:-

b) Magacawga Guddiga Maamulka iyo cadadka tiradooda

t) Magacaabidda Gudoomiyaha Guddiga Maamulka sida uu qabo qodobka 17 ee Xeerka Shirkadda;

j) Magacaabidda Guddiga Baarayaasha.

Intaan waa arrimaha caadiga ah, arrinta Caadi Dhaafka ah ee shirka qaraar looga gaarayo waxay tahay:-

b) Mudada jiritaanka Shirkadda oo la saa'idiyo lana gaarsiyo 31 Disembar 1992.

Muqdisho 5.1.78

GUDDIGA MAAMULKA

L. 478/Bis